## Xuquuqdeen leeyahay hadii dhibaato lay geysto oo dembi lay galo?

Qofna kuma talo galo inay dhibaato ku dhacdo oo dembi loo geysto, hadii ay noqoto xaditaan, daqar culus ama dhibaato kale: Dembiga lagaa galay wuu ku dhaawacayaa ama waad isku buuqaysaa, badanaa ma garan kartid waxa kuu haboon inaad samaysid. Warqadan oo wargelin kooban ah waxay kuu tilmaamaysaa meesha aad caawinaad ka heleyso iyo xuquuqdaada, hadii fal dembi ah laguu geeysto.

### Yaa i caawini kara?

Talo iyo caawinaad waxaad ka helaysaa xarumaha dhibanayaasha. Xarumahaas waxaa ka shaqeeya rag iyo haween si qaas ah wax u bartay oo khibrad weyn u leh dhibanayaal soo maray xaalada aad ku sugan tahay, waxay doonayaan inay ku dhegeystaan oo ay ku caawiyaan. Hadba dhibka ku hayo waxay ku siin karaan caawinaad baaxsan, sida dhaakhaatiirta saykolojiga ama kuwa jirka oo ay kuu gudbin karaan.

Dadka aad la xiriiri karto halkan ka eeg:

www.bmjv.de. Hadii kale waxaa ku caawini kara saldhigyada booliska am aka eeg interneetka bogga www.odabs.org adigoo eegaya liiska uuku qoranyahay dhibaatada laguu geeystay.

### Sidee dembi looga dacwoon karaa? Kadib maxaa dhacaya?

Hadii aad doonaysid inaad dembi lagaa galay ka dacwooto waxaad la xiriiri karta saldhig kasto oo booliska ah. Hadii aad dacwada dhiibtid kama noqon kortid, sabaabtoo ah xafiisyada dembi baarista (booliska iyo garyaqaanada dawlada) waa inay sharci ahaan dabagalaan kiis kasto oo dembi ah.

Dembiyada aan aad u adkeyn keliya (sida aflagaadada ama shay qaribeynta) buu dhibanuhu go´aan ka gaari gaari karaa in dacwada la joojinaayo ama inay dacwadu soconayso. Sidaas darteed waxaa dembiyada aan adkeyn lagu magacaabaa dacwooyinka-arjiga. Dembiyadaas waxaa la dabogalaa hadii uu dhibanuhu arji dacwad ah soo gudbiyo keliya. Arjiga waa inaad 3 bilood gudahooda kadib markii aad dembiga iyo dembiilaha ogaatay.

### Maxaan sameeyaa hadii aan Af-Jarmal uu igu adag yahay ama aan aqoon?

Taasi waxba dhibi mayso. Hadii aa doonaysid inaad dacwooto waa lagu caawinaayaa. Hadii markhaati ama markhaatiyad ahaan laguu yeero waxaad xaq u leedahay in tarjume ama tarjumad laguu keeno.

**Wargelintee baan ka heli karaa dacwada?**

Hadii aad tahay dhibane dembi laga galay si toos ah u helimaysid wargelin ku saabsan dacwada. Waa inaad isla markiiba booliska weydiisaa wargelinta aad u baahantahay,  hadii aad doonaysid waxaa lagaa wargelin karaa waxyaalahan hoos ku qoran:

- Waxaa lagu siinayaa warqad xaqiijinaysa dacwadaada
- Waxaa lagu ogaysiinayaa hadii uu xafiiska garyaqaanada dawlada uu dacwada joojiyo oo aan maxkamada loo gudbin.
- Waxaa lagaa wargelinayaa waqtiga iyo meesha dacwada maxkamadu ay ka furmayso iyo falka dembiilaha ama dembiilada lagu haysto.
- Waxaa lagu ogaysiinayaa natiijada kasoo baxdo dacwada maxkamada. Hadii uu xukun dhacay ama hadii dembigii la cadayn waayay oo la fasaxay ama hadii gebi ahaan dacwada la joojiyay.
- Waxaa lagu ogaysiinayaa hadii eedaysanaha ama eedaysanada xabsi la dhigay.
- Waxaa lagu ogaysiinayaa hadii eedaysanaha ama eedaysanada laga mamnuucay inay kula soo xiriiraan.

Waxa kale oo dheraad ah arji ku dalban kartaa wargelin ama waraaqo koobiga feelka in lagu siiyo.Tusaale ahaan hadii uu kiiska yahay mid shil gaadiid ah waxaad dalban kartaa sawir gacmeedka shilkaasi, kaasoo aad u isticmaali kartid inaad ku cadayso qasaarihii ama xanuunkii kasoo gaaray shilkaas si aad u hesho mag dhaw. Hadii aadan xaq u lahayn inaad waraaqahaas si toos ah u dalbato waa inaad arjigaaga ku sheegtaa sababta aad wargelinta feelka u doonaysid (hoos ka eeg dadka aan si toos ah xaqa ugu lahayn dalbashada waraaqahaas).

Sharciga waxuu kuu ogolaan karaa si qaas ah in loo tixgeliyo arjigaaga oo aad wargelinta feelka iyo koobigiisa heshid.

**Warbixintaada adoo markhaati ah.**

Hadii fal dembi ah lagaa galo oo aad dhibane tahay inaad markhaati ama markhaatiyad noqoto waxay muhiim u tahay kiiska dacwada. Caadi ahaan waa inaad booliska u sheegtaa waxaad ogtahay, badanaa waa inaad maxkamadana ku markhaati furtaa. Laakiin hadii tusaale ahaan eedaysanaha aad is qabtaan ama walaalo ama ehel aa tihiin, waxaad oran kartaa waxba sheegi maayo oo markhaati noqon maayo.

Booliska markuu ku waraysanaayo waa inaad magacaaga iyo ciwaankaaga sheegtaa. Hadii ay halis qaas ah jirto uma baahnid inaad booliska ciwaankaaga u sheegtid, tusaale: hadii qof uu kugu hanjabo inuu ku garaacayo ama ku dilaayo hadii aad warbixin booliska siisid Waxaad siin kartaa ciwaan kale oo lagaa heli karo. Ciwaankaasi kale waxuu noqon karaa xarunta dhibanayaasha oo aad xiriir laleedahay.

Inaad markhaati ama markhaatiyad aad noqoto maahan arin caadi kuu ah, arintaasoo culees ku saari karta ama kalif kugu noqon karta. Sidaas darteed waxaa laguu ogolyahay inaad qof soo kaxaysatid. Qofkaas waxuu noqon karaa walaalkaa ama walaashaada, xitaa saaxiibkaa ama saaxiibadaada waad soo kaxaysan kartaa: Qofka kula socda wuu kula joogi karaa intay dacwadu socoto, hadii aanay jirin sabab qaas ah oo loogu diidayo. Dabcan waxaad soo kaxaysan kartaa garyaqaan ama garyaqaanad qarashkana waxaa bixinayso dawlada. Hadii ay kula tahay inaad dacwadaada garyaqaan u baahan tahay. Weydii warbixinta dacwada marka hore qolada kaa qoraysa, hadii uu yahay booliska, xafiiska garyaqaanada dawlada ama maxkamadaba.
Weydii qofka dacwada kaa waraysanaayo!

**<u>Laga bilaabo 2017:</u>**

Hadii caruur iyo dhalin ay noqdaan dhibanayaal kufsi ama gacan ka hadal, waxaa la heli karaa dad shaqadooduay tahay inay ka warhayaan dhibanayaasha oo cilmi u leh xanaanayntooda. Intii dacwada ay socoto oo dhan, taasi waxaa lagu magacaabaa ka warhaynta dadwaynaha saykoolojigooda ee dacwooyinka. Marmar dadka waaweyn xitaa waxay noqon karaan dhibonayaal kufsi iyo gacan ka hadal culus, iyagoo u baahan ka warhayn iyo xanaanayn. Ka warhaynta dadwaynaha saykoolojigoodu waxay dhibanayaashu u tahay bilaa qarash , hadii ay maxkamadu xaqiijiso. Weydii booliska ama xarunta caawinaada dhibenayaasha, iyagaa wargelin dheeraad ah ku siin kara.

**Dacwada dawlada iyo dacwaydaydu malaysku xiriirin karaa?**

Hadii aad dhibane dembi laga galay tahay dacwo baad furi kartaa adiga oo ku xiriirinaya dacwada furan ee dawlada. Dacwooyinka shaqsi ahaan loo furan karo waxaa kamid ah kufsiga, nanaabid, isku dayid dil ah ama fal lagu dilay qof aad ehel tihiin.Hadii arinti ay sidaa tahay waxaad leedahay xuquuq qaas ah. Tusaale ahaan waxaad xaq u leedahay inaad marwalba ka qayb qaadatid kalfadhiga maxkamada ee dacwada (dadka kale marwalba xaq uma lahan).

**Yaa bixinaayo qarashka garyaqaankayga ama gartaqaanadayda?**

Hadii aad caawinaad garyaqaan u baahan tahay waxaa soo dalacmi kara qarash. Hadii eedaysanaha ama eedaysana dembi lagu xukmo waa inuu isaga ama iyada qarashka garyaqaanka bixiyo. Laakiin eedaysanayaasha la xukmo qaarbaan awoodin inay qarashka bixiyaan, sidaas darteed waxaa dhici kara inay kugu noqoto inaad qarashka adigu bixisid.

Marmar qaas ah waxaad maxkamada arji ku weydiisan kartaa in qarashka garyaqaanka ama garyaqaanada ay dawladu kaa bixiso. Taasi waa markay tusaale ahaan kiisku yahay mid kufsi ama gacan kahadal culus ama markii ay ehel kuu dhow sida caruur, waalid ama xaaskaaga dembi dil ah loo geeysto. Kiisaska noocan ah kuma xirna hadii aad qarashka bixin karto iyo hadii kale.

Xitaa waxaa dhici karta in kiisaska kale qarashka garyaqaanaha lagaa bixiyo hadii lacagta kusoo gasha bilkasta ay lacag yar tahay iyo adigoo xaq u leh inaad dacwada guud iyo taada isku xiriirisid.

**Mag dhaw; qasaaro celin iyo lacag xanuun tirid**

Ma dembi baa lagaa galay oo qasaare kuu keenay ama mag dhow lacag celin doonaysaa? Waxaad doonaysaa inaad arnitaan dacwadaa ku darsatid? Taasi caadi ahaan waa macquul (waxaa lagu magacaabaa Adhäsionsverfahren). Laakin waa inaad arji soo dalbato, arjigaas waxaad raacsiin kartaa dacwadaada.

Dabcan way kuu banaantahay inaad mag dhow ama lacag xanuunka tirayso inaad dacwad kale ku dalbatid, dacwadaas oo aan tan guud ahayn, waxay noqonaysaa dacwad shaqsi ah oo aad maxkamada si gooni ah uga furan doontid. Waxaad iyadana maxkamada ka dalban kartaa caawinaad dhaqaale oo dhanka qarashka garyaqaanka ah, hadii uu mushaharkaagu yar yahay.

**Xaquuqdee kale baan leeyahay?**

Ma dembi gacan kahadal ah baa caafimaadkaaga wax u dhimay? Marka wayuu sharciga caawinaada dhibanayaasha (Opferentschädigungsgesetz ) waxuu kuu ogol yahay inaad dawlada caawinaad waydiisato, hadii ay ku salaysantahay caafimaadkaaga (sida gaariga curyaamiinta iyo bakoorada socodka kaa caawinaysa) ama Lacagta la siiyo dadka shaqada ka fariistay ama aanan shaqayn karin (sida kabida lacagtii kusoo geli lahayd hadii aad shaqan kari lahayd ). Waxaad arji gaaban usii gudbin kartaa booliska.

Hadii aad tahay dhibane weerar cunsurinimo tabanaya ama aa tahay dhibane weerar qoloda seef la boodka ah (terrorism) tabanaya waxaad caawinaad dhaqaale ka dalban kartaa wasaarada cadaalada. Halkaas waxaad ka ogaanaysaa dhamaan shuruudaha iyo qaabka dacwada www.bundesjustizamt.de/ (Kalmada aad baaraysid waa Härteleistungen/Opferhilfe).

Hadii aad tahay dhibane dembi gacan kahadal guriga dhexdiisa loogu geystay waxaa laga yaabaa inaad heshid caawinaad (sida uu qoraayo sharciga kahortaga dembiga gacan kahadalka). Tusaale ahaan waxaad arji u qori kartaa maxkamada qoyska in qofkii dhibka kuu gaystay laga mamnuuco inuu xiriir kula yeesho. Maxakamadu waxay kuu ogolaan kartaa in gurigii aad lawadaagtay eedaysanaha ama eedaysanada in keligaa aad ku noolaato. Arjiyada loo baahan yahay waxaad u gudbin kartaa qoraal ahaan ama waxaad u duubi kartaa maqal ahaan. Uma baahnid inaad garyaqaan ama garyaqaanad aad wakiilatid.

**Waa maxay isu dheelitarka dhibanaha iyo eedaysanaha?**

Taasi waxaa lagu magacaabaa dacwad wada hadal loogu talo galay in dhibanaha dembigii laga galay kasoo kabsado. Dacwadani wada hadalka way ka duwan tahay kuwa caadiga ah, eedaysanaha ama eedaysanada waxaa si toos ah loo horkeenayaa qasaarihii iyo dhaawacii uu dhibanaha u geeystay. Taasi waxay noqon kartaa qasaare qalab ah oo uu eedaysanaha u geeystay dhibanaha dembiga loo geystay ama dhaawicid dhanka qalbiga iyo mooralka ah, bahdilaad shaqsiyeed ama cabsi ka dhalatay falkii dhibanaha lagu sameeyay.Isu dheelitir dhibane iyo eedaysane lama sameeyn karo hadii uu dhibanaha doonayn. Teeda kale eedaysanuhu waa inuu diyaar u yahay inuu mas´uuliyada falka uu geeystay qaado. Kiisaska qaarkooda isu dheelitirka dhibanaha iyo eedaysanaha waxay keeni kartaa xal wanaag ah oo dhibanaha u fududaynaysa inuu dhibaatada ka gudbo iyo sugida xaqa iyo nabada. Badanaa xafiiska garyaqaanada dawlada iyo booliska wax ku taliyaan in dacwadan wada hadalka ah la furo. Laakin maahan qayb ka mid ah dacwada guud ee caadiga ah, sidaas darteed waxaa loo qabtaa si gooni ah. Waxaana lagu qabtaa xarumo qaas ah iyo goobo kale oo ka shaqeeya dad wada heshiisiinta ku takhususay oo qibrad u leh.

Waxii wargelin dheeraad ah ee isu dheelitirka dhibanaha iyo eedaysanaha iyo xarumaha lagu qabto ee kuu dhow waxaad ka heleysaa interneetka, tusaale ahaan bogga http://www.toa-servicebuero.de/konfliktschlichter ama xitaa bogga http://www.bag-toa.de/.

**Qoraal yar iyo bogga interneetka oo wargelin dheeraad laga helayo**

Wargelin ku saabsan difaaca dhibanayaasha waxaad ka helaysaa bogga interneetka ee wasaarada cadaalada ee federaalka iyo difaaca maatada (BMJV). Halkaas waxaa kale oo aad ka helaysaa boggaga inteneetka ee gobol kasta oo jarmalka ka tirsan ( kuwaas oo aad ka eegi kartid xarumaha caawinaada dhibanayaasha oo degmo kasto)  iyo bogga keydka interneetka ee dhibanayaasha dembiga loo geystay (ODABS): http://www.bmjv.de/opferschutz

Wargelin kale oo dheeraad ah waxaad ka helaysaan qoraaladan yar yar:

- *„Opferfibel“ (Akhriska dhibanayaasha)*
- *„Ich habe Rechte“ (Xuquuq baan leeyahay)*
- *„Mehr Schutz bei häuslicher Gewalt“ (Difaac dheeraad ee guriga)*
- *„Beratungs- oder Prozesskostenhilfe“ (Xarumaha la talinta iyo caawinaada kharashka garyaqaanada*

*(ka eeg www.bmjv.de/publikationen)*

- „Hilfe für Opfer von Gewalttaten“ (Caawinaada dhibanayaasha gacan ka hadal)

*www.bmas.de/ (Erayga aad raadinaysid: Hilfe für Opfer von Gewalttaten)*

**Dalbashada sii faafinta**

Interneetka: www.bmjv.de

Boostada: Publikationsversand der Bundesregierung, (Sii gudbinta faafinta dawlada federaalka)

Postfach 48 10 09, 18132 Rostock

Telefoon: (030) 18 272 272 1 Fax: (030) 18 10 272 272 1

Qof walba baa dhibane dembi loo geeystay noqon kara una baahan kara difaac. Fadlan sidaas darteed haka gaabsan ee raadso caawinaad iyo talo ee xarumaha hoos ku taxan:

**DIFAACA DHIBANAHA EE BOOLISKA**

La talinta dhibanayaasha ee booliska waxay dhibanayaasha, markhaatiyada iyo ehelkooda dembiga loo geystay xarunta booliska ka helayaan difaac iyo talo. Waxii wargelin dheeraad ah ka eeg **www.polizei.rlp.de/Opferschutz**

| | |
|---|---|
| Saldhiga booliska ee Koblenz<br>Telefoon: 0261 - 103-2874, E-Mail:<br>opferschutz.ppkoblenz@polizei.rlp.de | Saldhiga booliska ee Mainz<br>Telefoon: 06131 - 65-3388, E-Mail:<br>opferschutz.ppmainz@polizei.rlp.de |
| Saldhiga booliska ee Westpfalz, Kaiserslautern<br>Telefoon: 0631 - 369-1404, E-Mail:<br>opferschutz.ppwestpfalz@polizei.rlp.de | Saldhiga booliska ee Rheinpfalz, Ludwigshafen<br>Telefoon: 0621 - 963-1154, E-Mail:<br>opferschutz.pprheinpfalz@polizei.rlp.de |
| Saldhiga booliska ee Trier<br>Telefoon: 0651 - 9779-1255, E-Mail:<br>opferschutz.pptrier@polizei.rlp.de | |

**Wasaarada garsoorka waxay fidinaysaa caawinaad**

Wasaarada garsoorka waxay bogga interneetka ee www.jm.rlp.opferschutz.de wargein kala duwan oo loogu talo galay dhibanayaasha, sida

- Zeugenkontaktstellen bei den Gerichten (Rugta xiriirka markhaatiyada maxkamada)
- Stiftung Rheinland-Pfalz für Opferschutz (Naadi difaacaya dhibanayaasha)
- Adhäsionsverfahren (Dacwad mag dhow)
- Täter-Opfer-Ausgleich (Isu dheelitir dhibane iyo eedaysane)
- Psychosoziale Prozessbegleitung (Saykoolojiga dadwaynaha ee dacwada)

**Ururo caawinaad oo kale**

Bogga interneetka **www.opferschutz.rlp.de**
ee dawlad goboleedka waxaad ka helaysaa liis ay ku qoran yihiin ururo badan oo wax caawina iyo urur talooyin soo jeediya xarumahooda ee gobolka Rheinland-Pfalz. Liiskaas waxaad ka heleysaa Telefoon-lr ee gargaar degdeg ah, fidin caawinaad iyo tilmaan ah halkaad ka heleysid caawinaad dhaqaale iyo mid aadanimo ah hadii dembi lagaa galo oo aad dhaawacanto.
Caawinaad waxaad kale ka heleysaa

- Caawinaad telefoon ee WEISSER RING e.V. oo loogu talo galay dhibanayaasha
  Telefoon: 116 006 , www.weisser-ring.de
- Caawinaad telefoon dembi gacan ka hadal loo geeysto dumarka
  Telefoon: 0800 116 016, www.hilfetelefon.de
- Unfallkasse Rheinland Pfalz oo loogu talo galay caawinada koowaad ee dhibanayaasha. Telefoon: 02632 960-0, www.ukrlp.de